# Soo Dhaweynta Ardaydeena: Dib u soocelinta Dugsiyo bad qaba

## Hagaha Tarjumaanka

Iyadoo la isticmaalayo dukumentiga gobolka ee la shaaciyay'' Soo dhaweynta ardaydeena: Dib u soocelinta dugsiyo ka  bad qaba COVID-19 K-12 qaabka hagidda dugsiyadda iyo nidaamka iyo sidoo kale waaxda qorsheynta ee dugsiyadda, waaxda socdaalka Winnipeg (IPW). Isu tagga soo galootiga cusubee Manitoba (MANSO) iyo waaxda dugsiyadda ee Winnipeg waxa ay uruuriyeen xog aasaasiya oo ku saabsan dib ugu noqoshada ardayda ee fasalada bisha September si ay ula wadaagaan xogtaan oo ah dhowr luqadood oo isugu jirta qoraal iyo hadal. Waxey xaqiijineysaa fahan iyo bayaamin ku aadan arimaha cudurka COVID-19.

Fadlan xusuusnow hadii aad qabtid suaalo inaad laxiriiri kartid madaxda bulshada ama sitoos ah maamulka iskuuladda.

Waxaan fahansanahay in xogaha ay marwalba isbadalayaan taasoo jaha wareerin karta waalidka iyo ardaydaba. Dukumentigaan iyo warbixinta lashaaciyay waa xogta ugu muhiimsan ee joogtada ah taasoo lagu shaaciyay dhamaan warqadaha kasoo baxay maamulka goboleedka iyo Waxbarashada Manitoba.

## Qorshaha Waaxda

- Dugsi walbo waxa uu abuuray qorshe ugooni ah kaasoo howlgalaya 8eeda September. Qorshe walba wuxuu raacaya nidaamka gobolka lakin wuxuu ku kala duwanaankaraa dhaqangelinta. Waxaa muhiim ah inaad sigaar ah ufahamtid qorshaha ay dugsigaaga iyo waaxdaada kushaqeynayaan. Linkiyada qorshayaalkii ugu danbeeyay guud ahaan Manitoba waxaa laga heli karaa. https://manitoba.ca/covid19/restoring/school-divisions.html

Resources

Soo dhawerynta ardaydeena iyo dib u soo celinta dugsiyo bad qaba. qaabka hagidda dugsiyadda lagu daray hagaha,waalidiinta daryeelaha iyo ardayda

https://www.gov.mb.ca/covid19/restoring/rss-practice-guidance.html

## Fadlan Tarjun/ Tarjun kuwaan soo socda

## Dib Ugu soodhaweynta ardaydeena  dugsiyadda

Iskuulka iyo waxbarashada waxey bilaabanayaan talaadada 8da September dhamaan ardayda dugsiyadda dowlada iyo kuwa madaxa banana. Warbixintaan waxey caawineysaa adiga iyo qoyskaaga.

## Jadwalka Iskuuladda

- Ardayda Kindergarten ilaa fasalka  8aad waxay aadi doonaan iskuulka 5 maalmood isbuucii, Isniinta ilaaJimcaha.
- Ardaydafasalka 9aad ilaa 12aad waxay aadidoonaan iskuulka 5maalmood isbuucii Isniinta ilaa jimcaha hadii iskuulkoodu xaqiijin karo kala fogaanshaha badqabka. Fadlan eeg websiteka iskuulkaaga.
- Ardayda leh baahiyaha gaarka ah waxaa loo ogolaandoonaa iskuulaadka 5maalmood isbuucii isniin ilaa jimcaha. Tani waxaa kamid ah baahida luuqadeed.Fadlan kahubso iskuulkaaga.
- Waqtiyadda iskuulka uu bilaabanayo ama dhamaanayo waxey ahaanayaan sidoodii hore kahor caabuqa Koroonaha (COVID-19_ Hadii aadan hubin fadlan kaxaqiiji bogga schookaaga ama wac xafiiska iskuulka.
- Waalidiinta looma ogola iney iskuulka galaan .Galitaanka iyo kabixitaanka iskuulaadka waalala socondoonaa. Waalidiinta iyo booqashadayaasha waa in ay wargaliyaan xafiiska.

## Barashada fog iyo xaafad wax kubarashada:

- Xaafad wax kubarashada waa adigoo wax ubaraya canugaaga si madax banan waxaana ku galaya dadaal iyo qarash dheeraad ah. Barashada fog waa adigoo meel kafog iskuulka wax ku baranaya adigoo kaalmo ka helaya shaqaalaha iskuulka.
- Iskuulaadka way joojiyeen ardayda xaafadaha wax lagu barayo marka lagareebo sabab gaar ah ama qoraal dhaqtareed. Hadii canugaagu uu Qatar  ugujiro xaalad caafimaad iskuulka wuxuu u sameyndoonaa qorshe gaar ah kaasoo u baahnaandoona qaabka waxbarashada fog. Waa inaad laxiriiirtaa iskuulkaaga si laguugu sameeyo qorshe.
- Hadii qoys uu ku bilaabo sanadka guri wax ku barasho uuna doonayo inuu u badasho iskuul dhigasho, iskuulka waa inuu dib u aqbalaa bartamaha sanadka.
- waxaa muhiim ah hadii aad isku qaladay guri wax kubarasho iyo waxbarashada fog aadna si kadis ah u diiwaangalisay canugaaga habqaldan waxaad laxiriiri kartaa iskuulkaaga sida ugu dhaqsiyaha badan.

## Habka bad qabka Covid:

- Macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulka waxey ka helayaan tababar hayadaha caafimaadka.
- Qaababka aad ku badbaadi kartid ee muhiimka ah waa:
    - Kafogoow 6talaabo ama 2mitir dadka kale. Tani waxaa ladhahaa kala fogaansho jismiyeed.
    - Xiro Mask markaaad joogto goob dad weyne ama aad udhawdahay dad kale.

- Dhaq ama kadil jeermiska gacmahaaga mar walbo. Isticmaal saabuun iyo mudo dhan 20 ilbiriqsi.
- Laabta ama gacanta hagalin dadka kale markaaad salaameysid
- Hawadaagina waxyaabaha gaarka ah sida cunada, waxyaabaha jirka lamarsado iyo maskiyadda.
- Iska ilaali taabashada sankaaga, afka iyo indhahaaga.
- Ku qufac ama ku hindhis tiish ama istiraasho kadib gacmahaaga udhaq si dhaqso ah.
- Guriga joog ama iskarantiil hadii aad isku aragtid calaamada COVID, ama aad usafartay meelka baxsan Manitoba ama aad lakulantay qof looga shakiyay xanuunka.

## Baaritaanka astaamaha iyo u diristaguryaha:

- Waalidiinta waa iney baaraan caruurtooda maalin walba iskuulka kahor si ay uxaqiijiyaan ineysan caruurtu laheyn calaamahada COVID:
    - Qandho iyo qarqar
    - Qufac ama duuf
    - Cabur ama Naqas
    - Murqo xanuun iyo daal
    - Lalabo iyo mataq
- Hadii canugaagu uuqabo calaamadaha COVID waa inaad ku reebtaa guriga, hadii aad iskuulka udirto guriga ayaa loo soo celindoonaa.
- Hadii uu canugaagu keeno calaamadaha isagoo iskuulka joogo waalagu ogeysiin doonaa si dhaqsa ah waana inaad utimaadaa oo kaxeysataa sida ugu dhaqsiyaha badan. Waa laga takoori doonaa fasalka iyo caruurta kale ilaa aad ka kaxeysaneyso.

## Kooxaha ardayda:

- Ardayda waxaa loo qeybin doonaa kooxo yar yar  tusaalo ahaan fasal kooxeed.
- Koox walbo oo arday ah waa iney udhaxeysaa afar (4)mitir. Koox walba dhexdeedana waa iney isu jirsadaan 1 mitir.
- Koox koox kale ku qasbi karto majirto Koox walba waxey leedahay  waqtiyo ugaar ah sida imaanshaha iyo bixitaanka iyo fasaxa qadada iyo nasashooyinka. Waa muhiim inaad ogaataa xiliga canugaaga uu iskuulka tagayo iyo xiliga uu kasoo baxaayo.
- Koox walbo waxay yeelan doontaa fasaxyo qado iyo Nasasho.

## Maskiyadda iyo agabka badbaadada:

- Ardayda fasalka 4aad iyo waxii kasareeya waa iney xirtaan mask Markey iskuulka gudihiisa joogaan.

- Ardayda ka hooseeya fasalka 4aad weyxiran karaan mask hadii uu waalidkoodu doonaayo.
- Waa in laxirtaa Mask dhamaan ardayda isticmaasha basaska iskuulka una dhaxeysa fasalada 4aad ilaa 12aad. Darawaladda basaska ayagana waa iney xirtaan mask. Iskuday in aad siisid canugaaga mask dib loo isticmaali karo. Calaamadee maskiga canugaaga barna sida loo xirto iyo sida la isaga furo
- Dhaq oo nadiifi maskigaaga (hadii dib loo isticmaali karo) Xaqiiji. Inuu nadiifyahay intaadan xiranin  ama uusan taaban meel jeermis leh intaadan xiranin.
- Hadii aadan uheli Karin canugaaga mask aanan kuwacaneyn fimaadka ogeysii iskuulka ayagaa kusiin doonee.

## Inta lagu gudo jiro barnaamijyadda iskuulka iyo kadib:

- Inta badan barnaamijyadda bulshada kama socondoonaan iskuulka marka lagareebo xanaanada maalinlaha ah. Inta badan barnaamijyadda iskuulka kadib lama qabandoono.  Fadlan ka hubi iskuulkaaga ama ururkaaga bulsho fursadaha kale.
- Cuwaaf  ama lama bixin doono, ardaydu waa in ay layimaadaan.
- Qadada waa labixindoonaa laakin fasalka gudihiisa ayaa lagu qaadan doonaa.

## Warbixin dheeraad ah:

- Qoraaladii ugu danbeeyay waxaa waalidiinta uqeybindoono iskuulka.  Fadlan kuxirnow iskuulka ama goobaha bulshada hadii aad ubaahantahay in aadfahamto warbixinta  Cusub.